



**DeKalb County**  
School District

## Aqbaaraha Borotokoolada Xirashada Maaskaraha

(Laga bilaabo Luuliyo 12, 2021)

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) ayaa ka go'an inay siiso jawiyada waxbarashada badqabka ah ardayda iyo shaqaalaha. DCSD way ku faraxsantahay inay dib ugu soo celiso ardayda dhismooyinkeena si markaas aan u sii wadno howlgalkeena ee aan ku bixino adeegyada waxbarashada simman si ay u buuxiso baahiyada ardayda.

Degmada ayaa sii joogteyso kormeerida isbadelada dacwadaha la soo wargeliya, oo ay ku jiraan korodhka dhawaan la soo sheegay ee faafida Delta Variant ee ka midka ah shaqsiyaadka aan tallaalneyn. Sida waafaqsan Hay'ada Caafimaadka Aduunka, Delta Variant ayaa hadeer ah ku badan Nooca Fayraska korona.

Warbixinta xigta ee la soo wargeliyay ayaa bixineyso hagid lagu hubinayo soo noqod badqab ah ee dugsiga, xafiisyada, iyo xarumaha oo ku bilaabanayo tallooyinka nagu caawinayo yareynta ku faafida COVID-19 dhismooyinkeena.

**Xarunta Xakameynta Cudurka (CDC) hagida la cusbooneysiisay laga bilaabo 7/9/21 ayaa ku talineyso in dugsiyada ay sii wadaan inay isticmaalaan xeeladaha ka hortaga COVID-19 ee sannad dugsiyeedka 2021-2022.**

Xeeladaha ka hortaga CDC ayaa ku talineyso inay muhiim tahay gaarsiinta badqabka ah ee waxbarashada qof ahaanta iyo si ay uga caawiso gudbinta COVID-19 ee dugsiyada waxaa ku jiro:

1. Istimaaalka caalamiga ah iyo isticmaalka saxda ah ee maaskarooyinka.
2. Ka fogaanshaha jireed illaa iyo xad suurtoagal ah.
3. Gacmo dhaqashada iyo hab dhaqanka neefsashada.
4. Nadiifinta iyo joogteynta xarumo caafimaadan.
5. Raadraaca u dhawaanshaha ee isku darka gooniyeynta iyo karantiilka.
6. Iska fiirinta aastaamaha COVID-19 gaar ahaan haddii aad u dhaweyd qof jiran. Haddii aad qabtid aastaamaha COVID-19, waa inaad is baartaa, guriga joogtaa, iyo ka fogaataa dadka kale.
7. Tallaal qaadashada.

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb ayaa fullinayo sida xigto:

● **Dhammaan ardayda waa inay xirtaan maaskarooyinka markii ay raacayaan basaska dugsiga.** Sharuudaan waxay waafaqsantahay tallooyinka CDC oo in dhammaan dadka ay xirtaan maaskarooyin markii ay isticmaalayaan gaadiidka.

● **Maaskarooyinka ayaa looga baahanyahay** ardayda da'da dugsiga hoose sabab la xiriirto helitaan la'aanta tallaalada da'da kooxdaan. Dugsiyada waxay isticmaalayaan hab dhaqamada ugu wanaagsan ee maqaayadaha kafeega iyo aagaga kale meesha ay ku adkaaneyso ardayda inay xirtaan maaskaro.

● Maaskarooyinka ayaa looga **baahanyahay** ardayda dugsiga dhexe iyo sare sidoo kale sida shaqaalaha oo dhan. Inkastoo maaskarooyinka shaqaalaha sida buuxdo u tallaalan iyo ardayda (12 iyo ka weyn) ay iqtiyaar ka yihiin hagida CDC, aan ku jirin taxadar badan, maaskarooyinka waxaa looga baahanayaa dhammaan dhismooyinka.

Degmada ayaa dib u eegeeyso qaababka wax ku oolka ah si loo aqoonsado ardayda iyo shaqaalaha ee la tallaalay oo waxay dib-u qiimeynayaan xirashada maaskaraha iqtiyaarka ah.

**Waaladiinta ayaa si xoogan loogu dhiirogelinayaa inay la tashtaan bixiyahooda daryeelka caafimaadka oo dooqyada tallaalka ugu wanaagsan ee qoyskooda.**

● Shaqaalaha ama ardayda ee soo bandhigaa aastaamaha COVID-19 waa inay joogaan guriga ee ka fogaadaan dadka kale oo ka raadiyaan bixiyaha daryeelka caafimaadka.

● Xirashada maaskarooyinka ayaa loo **baahanyahay** oo Barnaamijyada Maalinta Dugsiga La kordhiyay (ASEDP) ee howlaha gudaha ka dhacayo. Maaskarooyinka ayaa u ah **iqtiyaar** howlaha lagu qabto banaanka.

● Maaskarooyinka ayaa u ah **iqtiyaar** howlaha isboortiga ciyaaraha. Maaskarooyinka ayaa looga **baahanyahay** qolalka labiska, iyo qolalka jimicsiga. Kooxyada ciyaaraha ayaa looga baahanyahay raacida dhammaan nidaamyada ay aasaaseen Ururka Dugsiga Sare ee Georgia oo badqabka dhacdooyinka ciyaarta.

● Maaskarooyinka ayaa looga **baahanyahay** dhammaan kooxyada ku kulmaa gudaha. Maaskarooyinka ayaa u ah **iqtiyaar** howlaha lagu qabto banaanka.

● Shaqaalaha ayaa sii wadayo inay isticmaalaan Borotokoolka Degmada COVID-19 markii ay soo sheegayaan gaarista/dacwadaha laga helay COVID-19.

Dhismooyinka dugsiyada iyo Degmada ayaa sii wadayo inay ku dhaqmaan dhammaan xeeladaha ee yareynta. Degmada ayaa sii wadeyso kormeerida dacwadaha gudaha Gobolka iyo Degmada iyaga oo leh xaquuqda lagu cusbooneysiinayo hab dhaqamadooda, oo ay ku jiraan sharuuda oo dhammaan shaqaalaha iyo ardayda inay xirtaan maaskarooyinka.

Degmada ayaa sii wadeyso inay la shaqeyso jaalalka bulshada si ay u sheegaan codsiyada tallaalka, baaritaanka illaalada ama baaritaanka kooxda ku saleysan cilmi baarista ugu dambaysay dhawaan, wada tashiga caafimaadka iyo kobaca dacwadaha.



**DeKalb County**  
School District

